



Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WAR-SAXAAFADEED 004/2009

SRSR GA OO SOO DHOWEYEY CODEYNTA UU BARLAMAANKA U CODEEYEY KORDHINTA XUBNIHIISA

Jabuuti, 26ka Janaayo 2009 - Ergeyga Gaarka ah ee Qarammada Midoobay U Qaabilsan Arrimaha Soomaaliya, Ahmedou Ould-Abdallah ayaa soo dhoweeyey codeynta xoogga leh ee Barlamaanka Ku-meelgaarka ah ee Soomaaliyed uu ku oggolaaday ku khordhinta xubnaha 275 xubnood oo hor leh.

“Waxaa aad ii dhiirigeliyey sida xoogga leh ee uu Barlamaanku u codeeyey, waxaana rabaa in aan u mahad celiyo Madaxda Soomaaliyeed, Xubnaha Barlamaanka iyo kuwa gacanta ka geystay tallaabadan waxtarka leh,” ayuu yiri Axmedou Ould-Abdallah.

Natiijada Codeynta Barlamaanka waxay ka dhacday Guriga Ummadda ee Reer Jabuuti. Waxaana, 211 cod lagu oggolaaday ballaarinta Barlamaanka, 6 waa diidady 3 way ka aamustay.

Dawladda Federaalka ee Ku-meelgaarka ah iyo Isbahaysiga Dib u Xureynta Soomaaliya waxay bishii hore ee Oktoobar ku heshiiyeen ballaarinta Barlamaanka Federaalka ee Ku-meel-gaarka ah iyo dhismaha Dawlad leh Midnimo Qaran.

Waxaa la filaya ilaa iyo 200 ee xubnood oo cusub, uuna soo xulay Isbahaysiga Dib U Xureynta Soomaaliya in lagu dhaariyo Jabuuti. Barlamaanka la ballaariyeyna wuxuu doorandoona Madaxweyne cusub, kaasoo Xafiiska loo dhaarindoona 31 Janaayo 2009.

Toddobaatan iyo shanta kursi (75) ee haray waxaa loo qoondeeye kuwa weli aan ku soo biirin geedi-socodka nabadda, sida xubnaha bulshada rayidka iyo kuwa mucaaridka ah ee aan ka mid ahayn Isbahaysiga Dib U Xureynta Soomaaliya.

“Natiijadani waa mid aad u wanaagsan, waxayna dadka Soomaaliyed tusaalaynaysaa in Madaxdoodi ka go’antahay in ayaga oo wadajira horay ugu tallaabsadaan sidii nabadda iyo kala dambeynta loo soo celin lahaa,” ayuu yiri Ould-Abdallah.

“Arrintani waxay tahay in Soomaaliya ay helayso Madaxweyne cusub kaas oo ka qayb gelidoona kulan Madaxdeedka Midowga Afrika kaasoo ka dhicidoona magaalada Addis-Ababa 1da Febraayo assagoo muujindoona guusha lagu gaaray halkan muddo yar gudaheeda”.

“Bulshada Caalamka waxay kaalmo waxtar leh ka geysatay kullamada Barlamaanka. Sida caadadu ahaydna, Jabuuti waxay samaysay soo dhoweyn aad u diiran iyo taageeroba”.

Wixii war dheeraad ah fadlan la xiriir: Susannah Price / Donna Cusumano,
Public Information Officers, UN Political Office for Somalia (Nairobi, Kenya)
Tel: +254 20 762 7132 / 7133 or +254 733902020 / 737400133
Fadlan booqo: www.UN-Somalia.org